

## Magacaabista abaalmarinta ugu sarraysa ee Alberta waa furan tahay

Janaayo 4, 2024

Dadka reer Alberta waxa lagu dhiirigelinaya inay u magacaabaan xubno bulsho, hoggaamiyayaal iyo hal abuuro waxtar leh oo xubno ka noqda Alberta Order of Excellence.

Amarku waa abaalmarinta ugu saraysa ee gobolka oo waxa uu aqoonsadaa muwaadiniinta gacan wayn oo la taaban karo ka gaystay bulshooyinkooda. Xubnaha waxa ku jira ciyaartoyga Ciyaaraha Fudud, saynisyahano, isdirayaal, mutadawiciin, hogaamiyayaasha ganacsiga, iyo fanaaniin. 212 qof oo reer Alberta ah ayaa maalgaliyey Alberta Order of Excellence ilaa markii la asaasay 1979.

Magacaabistu waxa ay furan tahay sanadka oo dhan, laakiin waxa waajib ah in la helo ugu dambayn Febraayo. 15 si loogu tixgaliyo magacaabista sanadkan.

Dadka la soo magacaabayaa waa inay yihii muwaadiniin Kanadiyaan ah oo deggan Alberta, haddii la soo xulo, waxa waajib ah inay awoodaan ka qaybgalka xafiladda magacaabida. Dadka qofna isagu isma magacaabi karo, lammaanihiisa ma magacaabi karo ama xubin qoyskiisa dhaw ah ma magacaabi karo.

Macluumaad ku saabsan Amarka, oo ay ku jiraan hagitaanada magacaabista, foomamka magacaabista iyo taariikh nololeedka dadka hore loo magaacabay ayaa laga heli karaa websaytka [Alberta Order of Excellence](#).

Sidoo kale waxaad macluumaad heli kartaa addoo soo wacaya 780-449-0517.

### Macluumaadka la xidhiidha

[Alberta Order of Excellence](#)

### Su'aalaha warbaahinta

Gary G. Mar  
[mar@cwf.ca](mailto:mar@cwf.ca)  
587-897-3311  
Guddoonka,  
Alberta Order of Excellence Council  
(iimayla [mccaw@cwf.ca](mailto:mccaw@cwf.ca) si loo diyaariyo waraysiyo)

Gayle Stannard  
[gaylest@telus.net](mailto:gaylest@telus.net)  
780-953-4020  
Agaasimaha Guud,  
Alberta Order of Excellence